Fakta om Tuberkulos på Somaliska

Xaqiiqada qaaxada

Waa maxey qaaxo?

Qaaxada (oo loogu yeero xataa TBC ama TB) oo ah cudur jeermis keeno oo la is qaadsiiyo waxa sababa jeermiska *Mycobacterium tuberculosis*. Wuxuu cudurku badanaa keenaa xanuun sanbabada ah, iyaduu saameyn karo qeybaha kale ee jirka sida qanjirada jirka, qalfoofka, maskaxda ama kalyaha.

Qaaxada waa ka caadi qeybo badan oo ka mida dunida iyadoo sanad kastaa ay malyuumo dada u dhintaan cudurka. Iswiidhen waxa sanadkii u bukooda cudurka 600-700 qof taasoo u dhiganta 7 qof oo ka mida 100 000 ee qof. Taasi waxey ka mid tahay tirada ugu yar dunida. Dadka halkan ku xanuunsada badankoodu waa dad qaan gaar dhalinyar oo ku dhashay meel ka baxsan Iswiidhen. Dad waaweyn ayaa iyagunu u xanuunsan kara cudurka qaaxada, laakin badanaa dadkaa waxey wateen cudurka oo u qarsoonaa sanado badan. Dad badan oo ka mida dadkaa waaweyn ee qaba cudurka qaaxada waxey ku dhasheen Iswiidhen.

Sidee la isu qaadsiiyaa qaaxada?

Qaaxada waxey ka faaftaa dadka qaangaarka ah qaba qaaxada sanbabka ee furan. Waa kheyra caadi in qof ka yar qaan gaar dad kale qaadsiin karo. Jeermiska ayaa ku faafa hawada marka la qufaco ama hindhiso kolkaasoo qof kale qaato neefta la socota dhibcaha yar-yar ee wata jeermiska. Qaaxadu waxey badanaa ku dhex faaftaa dad mudo badan hoosta isaga jira. Taas darteed ayey badanaa u saameysaa dadka guriga lagula nool yahay. Waalidka ayaa ilmahooda qaadsiin kara iyadoo saaxibada isku dhow dhowina is qaadsiin karaan. Wey yar tahay in qof lagu qaadsiiyo xiriir aan badneyn, tusaale ahaan goob shaqo. Qofka qaba qaaxada sanbabada waxa dhaqtarkiisu u sheegaa siduu u dhaqmi lahaa si looga baxsado inuu dadka kale qaadsiiyo. Marka loo eego sharciga difaaca cudur is-qaadsiinta waxa qofka *waajib* ka saaran yahay inuu raaco shuruucdaa. Mudo kadib markuu qofku qaato dawo waxa istaaga qaadsiinta uu dad kale qaadsiin karo taana jawaabteeda ayaa la siiyaa qofka bukaan-socodka ah. *Qaaxada la iskuma qaadsiiyo* cunada, qaadooyinka iyo mindiyaha, dharka ama waxyaabaha kale. Qaaxada aan aheyn tan neef-wadeenada (tusaale ahaan tan qanjirada iyo dhabarka) la isma qaadsiiyo. Mida kale qaaxada la iskuma qaadsiiyo meelaha dibadda ah.

Waa maxey farqiga u dhaxeeya in qofku qabo qaaxada iyo qofka la bukooda qaaxada?

Qofka u la bukooda qaaxada wuxuu badanaa wataa jeermis badan oo aktif ku ah jirka. Qofkaa wuxuu badanaa leeyahay astaamaha cudurka iyadoo isla markaa haddi qaaxadu ku dhacdo sanbabada ay keeni karto in qofaa dadka kale qaadsiin karo. Qaaxada waxey leedahay dawo. Haddii la daweyn waayo qaaxada waxey keeni kartaa in jeermisku faafo oo weeraro xubno kale ee jirka. Qaaxada aan la daweyn waxey sababi kartaa dhaawac joogto ah iyo dhimasho.

Qofka qaba qaaxada balse aan wali xanuunsan waxuu wataa waxa loogu yeero qaaxo qarsoon. Jeermiska uu qofkaa wato wuu yar yahay isla markaa ma aha jeermis aktif ah. Qofka wata qaaxada ma xanuunsana dad kalana ma qaadsiin karo. Waxa dhici karta in mar danbe ee nolosha qofkaa uu jeermisku aktif noqdo qofkuna xanuunsado. Sidaa darteed ayaa dawo loo siin karaaa dadka qaada qaaxada si looga hortago iney xanuunsadaan mar danbe taasoo ah daweyn ka hor tag ah.

Yaa qaadi kara qaaxada?

Cid kasta ayaa qaadi karta qaaxada. Dadka qaada qaaxada qiyaastii tobonkii qof ayaa bukooda. Waxey qaadan kartaa sanado badan in qofka qaaday qaaxada uu u bukooda. Qatarka in qofku aad u xanuunsado waxey aad ugu badan tahay caruurta yar yar, dumarka mar dhow dhalay iyo dadka difaaca jirkoodu hooseeyo. Balse dhamaan dadka qaada qaaxada, xataa kuwooda dhalinyarada caafimaadka qabta ah, wey la xanuunsan karaan qaaxada.

Maxaa lagu gartaa qaaxada?

Calaamadda ugu badan ee lagu garto dadka waaweyn ee qaba qaaxada sanbabada waa qofac aan dhamaan ee socoda dhowr todobaad xataa haddii qofkaa la siiyo dawada antibiyootikada ee caadiga ah. Mararka qaar qofka waxa xanuuna bogga isagoo soo xaakadiisu dhiig wadato. Qancdho,cunto xumi, culeyska qofka oo hoos u dhaca, dhidid badan ee habeenkii ah iyo daal guud ayaa ah astmaaha kale ee lagu garto cudurka. Haddii qofku qabo qaaxo xubnaha kale ee jirka ee aan aheyn sanbabada qofkaa astaamo cudur ayaa meeshaa ka dareemaa, sida barar qanjirada jirka, dhabar xanuun iyo madax xanuun. Caruurta qabta qaaxada waxa badanaa lagu gartaa qandho oo kaliya iyo iyagoo mararka qaar lagu arko astaamo u eg kuwa neefta iyo barar qanjirada jirka. Waa in dhaqtar lala xiriiraa markaa haddii ilmo yari uu qaado cudurka qaaxada.

Sidee lagu garan karaa in cudurka qaaxada kugu dhacay?

Haddii dhaqtarku ka shakiyo in qof uu qaadan cudurka qaaxada waxa sida caadiga ah la sameeyaa baaritaan maqaarka jirka ah (tuberkulintest/PPD iyo/ama tijaabo dhiig io raajo sanbabada ah). Haddii baaritaanka lagu ogaado in qofku qabo qaaxo, lagana shakiyo iney tahay mid aktif ah, waxa la qaadaa tijaabooyin dheeri ah sida xaako, dareere laga qaado sanbabada ama tijaabo laga qaado sida qanjirka bararay. Caruurta waxa badanaa laga qaadaa beerid dheecaanka caloosha.

Siduu u shaqeeyaa baaritaanka tuberkulintest (PPD)?

Baaritaanka tuberkulintest (PPD) waa baarid maqaarka jirka halkaasoo ladu mudo jirka cirbad wadata borotiin laga soo qaaday jeermiska qaaxada. Qofka qaba qaaxada waxa sida caadiga soo barara maqaarka jirka. Waxey qaadataa ilaa iyo 2-3 bilood laga bilaabo marka qofku qaaday cudurka ilaa iyo marka tijaabada lagu ogaan karo. Tijaabadu waxey xataa keeni kartaa in qofku jirku soo bararo isagoon qabin qaaxada.

Tijaabo dhiig ah ma la qaadi karaa si loo ogaado in qofku qabo qaaxo?

Waxa jira tijaabo dhiig oo soo saari karta haddii qofku mar uun ay jirkiisa galay jeermiska qaaxada. Laakin tijaabada dhiiga, iyo tan maqaarka jirkaba, ma kala saarayaan cudurka qarsoon iyo kan aktifka ah. Tijaabada dhiiga waxa mararka qaar loo isticmaalaa booskii baaritaan tuberkulintestet ama in lagu dhameestiro.

Maxaa dhacaya haddii qofku qabo qaaxo?

Qofka u bukooda qaaxada waxa la siiyaa dawada qaaxada. Qofka haddii uu dawada qaato maalin kasta waxaa ka bogsanayaa cudurka wuxuuna noqonayaa qof caafimaad qaba. Waqtiga dawada waa 6 bilood ugu yaraan dawaduna waa bilaash.

Maxaa loola jeedaa raad-raaca cudurka?

Marka qofi u xanuunsado qaaxada waxa la sameeyaa raad-raac si loo helo dadka kale ee laga yaabo iney qaadeen cudurka ama dad kale qaadsiin kara. Baaritaanka waxa loo maraa qaabka baarid maqaarka jir (tuberkulintest/PPD) iyo/ama raajo sanbabka ah. Raad-raaca cudurka waa muhim si looga hortago faafidda qaaxada iyo sida uu qabo sharciga difaaca faafinta cudurada in qofka xanuunsan iyo dadka kalaba loo yeero ayna u yimaadaan baaritaan. Caruurta yar yar qatar weyn ayey ugu jiraan dhib weyni ka soo gaaro cudurka qaaxada.

Maxaa loola jeedaa sharciga hab dhaqanka ee dhaqtarku bixiyo?

Qaaxadu waa ”cudur dadweynaha qatar ku ah” sida uu qabo shaciga iswiidhishka ee difaaca faafinta cudurada. Waxa loola jeedaa in daweynta, daryeelka iyo qaadida baaritaanka cudurku yihiin bilaash. Waxaa taa micnahoodu yahay iyadana in qofka qaba qaaxada aktifka sida sharciga qabo uu waajib ka saaran yahay inuu raaco hab dhaqanka shuruucda ee dhaqtarka bixiyo. Waa in qofku tagaa balamaha dhaqtarka iyo kalkaalisada caafimaad. Waa inuu ka qeyb qaataa raad-raaca cudurka raacaana shuruucda dhaqtarka bixiyo si looga hortago faafinta cudurka si aan dadka kale loo gaarsiin. Qofka u arka in shuruucda hab-dhaqanku aaney macquul aheyn wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado baaritaan maxkamadeed ee laga dalbanayo dhaqtarka difaaca faafinta cudurada. Intuu qofka sugayo maxkamadda waa inuu raacaa shuruucda dhaqtarka.

Qof mar kale qaaxadu ma ku dhici karta marka laga daweeyo?

Haa, haddii cudurka aan loo daweyn si saxa oo ku filan waxa dhici karta in cudurku soo noqdo. Sidaa darteed waa muhim inaad si saxa u raacdaa qaabka daweynta qaaxada iyo inaadana iloowin qaadashada kaniiniyada. Mida kale qofka ka bogsaday qaaxada mar kale ayaa qof kale qaadsiin karaa qaaxada isagoo la bukoon kara.

Ma la iska talaali karaa qaaxada?

Talaalka qaaxada (BCG) wuxuu kaa difaaci karaa noocyada ugu qatarsan ee qaaxada, sida xanuunka xuubka maskaxda, laakin wuxuu ku siinayaa difaaci aan badneyn ee qaaxada sanbabada. Caruurta yar yar ayaa si gooni ugu nugul iyadoo Iswiidhen la talaalo caruurta qatarta weyn ugu jirto in cudurka la qaadsiiyo, tusaale ahaan haddii ay la kulmaan qaraabo ka timid wadamada ay qaaxada caadiga ka tahay ama ay booqdaan wadamadaa. Qofka isagoo qaatay talaalka BCG ayaa haddana uu qaadi karaa una xanuunsan karaa cudurka.

Xaggee la isaga baari karaa qaaxada?

Baaritaanka qaaxada waxa lagu sameeyaa rugaha caafimaadka iyadoo caruurtana looga baari karo kilinigyada cudurada sanbabada iyo kuwa faafa ee cisbitaalada. Waa muhim in dhaqtarka loo sheego haddii qofku ka shakiyo inuu qaaday cudurka qaaxada mar dhow ama mar hore noloshiisa. Qaaxada waxa lagu daweyn karaa dawo iyadoo qofka bukaan socodka ahna aan lacag laga qaadeyn.

Aqriso warbixin intaa dheer ee ku saabsan qaaxada

Sjukvårdsupplysningen:

www.1177.se *– baar tuberkulos*

http://www.1177.se/Norrbotten/Fakta-och-rad/Sjukdomar/Tuberkulos--tbc/

Folkhälsomyndighetens hemsida:
http://www.folkhalsomyndigheten.se/